

Luulyo 2024 Vermont Flood Resources

Rogaal celinta Gobolka Vermont

- Taariikhdu markay ahayd Luulyo 10-11, 2024, Vermont waxaa soo wajahay daadad fara badan oo ku dhuftay bulshooyin badan oo dhowr ismaamul ah.
- Taariikhdu markay ahayd Luulyo 10 [Guddoomiyaha gobolku wuxuu sii kordhiyay Xaaladdii Degdega ahayd ee loogu dhawaaqay Gobolka 2023 daadadka awgood si loo daboolo ka jawaabista daadadka hadda.](#)
- State Emergency Operations Center (SEOC) waxay iskudubaridaysaa ka jawaabista Gobolka, waxayna dowladaha hoose ka caawinaysaa sidii ay uga jawaabi lahaayeen baahiyaha degdega ah una qorshayn lahaayeen soo kabashada.
- [Gobolka Vermont wuxuu dalbaday qiimaynta waxyeelada](#) oo ay qiimaynayso FEMA si loo go'aamiyo in Vermont ay u qalanto Public Assistance Disaster Declaration. Qiimaynta waxaa laga samayn doonaa ismaamulada Addison, Orleans, Washington, Caledonia, Chittenden, Lamoille, Orange, iyo Essex.
- [Gobolku wuxuu dalbaday qiimaynta waxyeelada](#) oo ay qiimaynayso FEMA si loo go'aamiyo in Vermont ay u qalanto Public Assistance Disaster Declaration. Qiimaynta waxaa laga samaynayaa ismaamulada Washington iyo Caledonia.

Waxaad samaynayso haddii gurigaaga ama ganacsigaagu waxyeeloobo

- **Kala xiriir waxyaabaha ku saabsan baahiyaha iyo adeegyada degdegga ah:**
 - Haddii aad ubaahan tahay [hoiyada xaaladaha degdega ah](#), cunto ama adeegyo kale ee caawimo, wac 211 adiga oo garaacaya 2-1-1.
 - Si aad u hesho kaalmada caafimaadka dhimirka, wac 988 adiga oo garaacaya 9-8-8.
 - Si aad u hesho kaalmooyinka shaqo-la'aanta, [bookho Vermont Department of Labor Flood boggooda](#). ([luuqado badan](#))
- **Diiwaangali waxyeelada:** Inaad diiwaangaliso waxyeeladaada waxay muhiim u tahay laba sababood darto: 1) waxay wax kuu tari doontaa haddii aad soo gudbiso sheegasho caymis ah iyo 2) waxay gobolka ka caawinaysaa inuu dalbado kaalmada musiibooyinka federaalka. Hoos waxaad ka helaysaa tilmaamo kaa caawinaya nidaamkan:
 - Ka qaad sawiraan, muuqaalo, iyo qoraalo **kahor** inta aadan bilaabin inaad nadiifiso.
 - Ka qaad sawiraan, muuqaalo, iyo qoraalo marka aad nadiifinayso.
 - Xafido rasiidyada si aad ula socoto kharashaadka kaaga baxay nadiifinta.
- **Nadiifi oo qalaji guriga:**
 - Ka saar dhammaan waxyaabaha qoyan gurigaaga oo iska saar qashinka daadku keenay
 - Fur albaabada iyo daaqadaha.
 - Isticmaal marwaxadaha iyo qalajiyaha haddii aysan dhibaato keenayn.
 - Iska saar qashinka daadku keenay adiga oo gaynaya goobaha dadweyeynaha islamarkiiba. Hogaamiyeyaasha gobolka iyo kuwa deegaanka ayaa hadda ka shaqaynaya qorsheyaashii lagu qaadi lahaa. Meel gaar ah dhig waxyaabaha khatarta leh si aad hadhow dib ugu tuurto.

- **Kasoo warbixi waxyeelada:**
 - La xiriir shirkaddaada caymiska.
 - Soo gudbi dhammaanba waxyeelada, xataa haddii aadan soo gudbinayn sheegasho caymis, adiga oo usoo gudbinaya Vermont 211. Waxaad usoo gudbin kartaa si onleen ah adiga oo bookhanaya www.vermont211.org. Isticmaal “[Foomka Guriga](#)” ama “[Foomka Ganacsiga](#)” ee kujira meesha bogga ugu koreysa si aad waxyeelada usoo gudbiso. Waxaad sidoo kale waxyeelada kusoo gudbin kartaa teleefoonka adiga oo garaacaya 2-1-1.
 - Xattaa haddii ay kusoo gaartay khasaaro aad u yar, fadlan usoo gudbi 211. Si aan ugu qalano Kaalmada Shakhsiyaadka ee federaalku maalgaliyo, waa inaan gaarnaa heerka ugu hooseeya ee waxyeelada, sidaa darteed waa inaan helnaa macluumaadka ugu badan ee ugu macquulsan.
- **Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo nadiifinta?** Dadka reer Vermont waxay wacan karaan Crisis Cleanup Hotline ee gobolka si ay u codsadaan caawimaad loogana caawiyo nadiifinta burburka, tirtirista jardiinada, ama shaqada kale ee soo kabashada ah. Ka wac Crisis Cleanup Hotline 802-242-2054.
- **La tacaallida qashinka:** Marka aad nadiifinayso, dhinac u sooc wixii qashin ah waxaadna dhigtaa dhinaca midig ee waddada si dowladda hoose utuurto. Meel gaar ah dhig waxyaabaha khatarta leh si aad hadhow dib ugu tuurto. [Bookho Agency of Natural Resources’ Flood boggeeda](#) si aad u hesho hagitaan dheeraad ah oo ku saabsan nadiifinta daadka.
- **Arkay ay Noqoto Beeraha:** Ka eeg [hagitaanada dheeraadka ah ee loogu talogaly beeralayda](#) ee ku jira [Agency of Agriculture’s Flood boggeeda](#).
- **Naftaada Badbaadi:** Raac hagitaanka nabadgalyada marka aad guriga kusoo laabanayso, nadiifinta, iyo xeeladaha guud ee daadka ka danbeeya. Hagitaanada ka hel hoose.

Waxa ay hogaamiyeyaasha magaalada iyo dowladaha hoose

Waxay sii wadayaan dayactirka kaabyaasha bulshada ayaga oo si dhow u diiwaangalinaya kharashaadka, sawirana ka qaadaya horusocodka. Haddii dowladda federaalka ah ay ansixiso ku dhawaaqidda masiibada, waxaa lagaa kabayaa ka rogaal celinta xaaladda iyo kasoo kabashada.

Wixii macluumaad dheeraad ah [bookho Vermont Emergency Management’s 2024 Flood Recovery page](#).

Macluumaadka Xirista Waddooyinka

- Isha ugu wanaagsan ee laga heli karo macluumaadka wakhti xaadirkan ee ku saabsan xirista waddooyinka iyo waddooyinka waaweyn ee gobolka iyo kuwa gobolada isku xira waa [New England 511 website](#). Agency of Transportation ayaa wixii xog ah ee cusub ku dara websaytkan si joogto ah.
- Si aad u hesho macluumaadka ku saabsan xirista waddooyinka maxaliga ah, isticmaal app-ka Waze.

Hagitaanada badbaadada ee daadka kaddib

- [Department of Health](#): Ogow sida [si nabadgalyo ah guriga loogu soo laabto ama ganacsigaaga](#), [loo tijaabiyo biyahaaga](#) loona [nadiifiyo](#) daadka kaddib.
- [Agency of Natural Resources](#): Ogow sida si ammaan ah [loo nadiifiyo loona tuuro waxyaabaha](#), [loo xaqiijiyo in biyaha la cabayo nadiif yihiin](#), [dib loo soo saaro](#), iyo waxyaabo kale.
- [Agency of Agriculture](#): Hel hagitaanka badbaadada ee ganacsiga beeraha, oo ay ku jiraan [howlaha maalinlaha ah](#), [hibka iyo soo saareyaasha digaagga](#), [beeralayda dalagga](#), [soo saareyaasha dalagga](#), iyo waxyaabo kale.

Sida aad wax u caawin karto

- Si aad si mutadawcnimo ah ugu nadiifiso daadka, bookho www.vermont.gov/volunteer.
- Ugu deeq kaalmada dhibanyaasha daaddaka adiga oo u marinaya Vermont Community Foundation's [Vermont Flood Response and Recovery Fund](#).
- Shirkadaha iyo ururada doonaya inay bixiyaan deeq wanaagsan oo balaaran waxay wici karaan 888-653-7715 ama iimayl u diri karaan donations@vermont.gov.
- Bulshooyin fara badan ayaa leh dadaalo mutadawcnimo oo maxali ah, sidaa darteed ka eeg websaytyada magaaladaada ama caasimaddaada iyo kooxaha baraha bulshada ee maxaliga ah si aad u hesho fursado dheeraad ah.

Link-yada Kooban

Translated Flood Resources - vem.vermont.gov/flood/translation

Vermont Emergency Management – vem.vermont.gov/flood

Vermont Department of Health - healthvermont.gov/flood

Agency of Natural Resources - anr.vermont.gov/flood

Agency of Commerce and Community Development - accd.vermont.gov/flood

Vermont Department of Labor - labor.vermont.gov/flood-safety-resources

Agency of Agriculture - agriculture.vermont.gov/flood

Department of Mental Health - mentalhealth.vermont.gov/flood

Volunteer for Storm Recovery - vermont.gov/volunteer